



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Ogoosto 12, 2021-ka

Ku socota: Daryeel Bixiyayaasha ODDS iyo Hay'adaha Maamulka Kiiska

Keydso Taariikhda: Ogoosto 26, 2021-ka

Sidii aan ku tilmaamay [farriintii Agaasimaha ee hore](#), ODDS waxay hirgelinaysaa noocyada heerarka lacageed oo cusub Luulyo 2022.

Noocyada heerarka lacageed oo cusub ayaa hadda laga heli karaa dhanka internet-ka [website-ka Compass](#).

10 subaxnimo. Bisha Ogoosto 26, 2021, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) wuxuu qabanayaa kulanka dhanka internet-ka oo laba saacadood ah oo lala yeelanayo Shaqaalaha Maamulka Caafimaadka (HMA) (oo hore loogu yaqaanay Burns and Associates) si loo bixiyo guudmarka noocyada heerarka lacageed oo cusub oo loogu talagalay daryeel bixiyayaasha.

ODDS waxay toddobaadka soo socda diri doontaa meel laga sii gelayo 'link' kulanka dhanka internet-ka iyo faahfaahino kale. Fadlan qabso taariikh si aad uga soo qayb gasho dhacdadani. Haddii aad awoodi waydo in aad ka soo qayb gasho, kulanka dhanka internet-ka waa la duubi doonaa waxaa la soo gelin doonaa internet-ka.

Si aad u codsado qorshayaal la xiriira kulankan dhanka internet-ka, email u dir DD.DirectorsOffice@dhs.oregon.gov ugu yaraan 48 saacadood ka hor dhacdada.

Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu ogaado isla markaana isticmaalo barnaamijyada iyo adeegyada ODHS. ODHS waxay bixisaa caawimaad

lacag la'aan ah. Tusaalooyinka qaarkood ee caawimaada lacag la'aanta ah ee ODHS bixin karto waa: luqadda calaamadaha iyo turjumaadaha luqadaha lagu hadlo, waxyaalo luqaddo kale ku qoran, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille, far waaweyn, cajalada la duubo iyo noocyada kale. Haddii aad u baahan tahay caawimaad ama aad hayso su'aalo, fadlan Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka kala xiriir 503-945-5811, 711 TTY, DD.DirectorsOffice@dhsosha.state.or.us ugu yaraan 48 saacadood ka hor kulanka.